Liverpool University Hospitals
NHS Foundation Trust

Patient information

# Sida Loo Isticmaalo Dhibcaha/Goojada Indhaha ee Fluorouracil 1%

Waaxda Indhaha ee Isbitaalka St Paul

Waxaa laguu qoray dhibcaha/guujada indhaha Fluorouracil 1% si lagaaga daweeyo xaalada caafimaad ee ishaada. Fluorouracil 1 % waa walax sun ku ah unugyada jirka, taas oo waxyeelo keeni karta haddii si khaldan loo isticmaalo. Sidaa darteed waa muhiim inaad si taxadar leh u maareyso guujooyinkaaga, adigoo u isticmaalaya kaliya sida laguugu soo qoray.

## Intee jeer ayaan isticmaalaa dhibcaha/goojooyinka indhahayga?

Hal dhibic waa in lagu dhibciyaa ishaada xanuunsan afar jeer maalin kasta (tusaale ahaan 7am, 12pm, 5pm, 10pm) ilaa afar maalmood afartii toddobaadba ilaa afar bilood.

Dhibcaha/goojooyinka waxaa lagu siin doonaa/laguu keeni doonaa afartii toddobaadba hal mar (tusaale ahaan, hal usbuuc markiiba) waxaana lagaa siin doonaa farmashiyaha isbitaalka sababtoo ah ma lahan wax keydin ah.

Dhakhtarka ayaa kaala hadli doona muddada daawaynta. Caadiyan, muddo afar maalmood ah oo daawayn ah oo afar todobaad loo kala dhaxeeysiinaayo ayaa lagu celin doonaa afar jeer, laakiin dhakhtarku wuxuu baari doonaa ishaada afartii toddobaadba mar, haddii aad wax dhibaato ah ama falcelin ah kala kulanto dhibcaha/goojooyinka, daawada waa la yareyn doonaa.

Waxaa lagu siin doonaa sahay ah galoofisyada la tuuri karo. Weel gaar ah ayaa sidoo kale lagu siin doonaa si aad markaa badbaado leh ugu ridi karto dhalooyinka, furka iyo wax walba oo daawada ka mid ah uu tuuritaan u baahan oo aad isticmaashay iwm. Galoofis cusub waa in la isticmaalaa mar kasta oo aad gacma-gacmayso guujooyinka. Galoofisyada la isticmaalay iyo dhammaan qashinka kale (tusaale ahaan, wixii tiish ah oo loo isticmaaley in lagu tirtiro isha kadib marka lagu shubo dhibcaha/guujada) waa in sidoo kale lagu ridaa weelka lagu siiyey.

Marka la dhameeyo daawada, weelka waa in la xiraa oo lagu soo celiyaa farmashiyaha isbitaalka si markaa si badbaado leh loogu tuuro (ha ahaato isbitaalka ku yaala xaafadaada ama marka aad ku soo laabanayso Liverpool).

Haddii aad u baahan tahay inaad isticmaasho dhibco/guujooyin kale isla wakhtiga/maalinta aad qaadanayso dhibcahaan, fadlan u kala dhaxeysii ugu yaraan shan daqiiqo si aad uga fogaato in hal guujo/dhibic ay ku dhex milanto mid kale.

## Sideen u isticmaalaa goojooyinka/dhibcaha?

- Xaqiiji inaad haysato tiish nadiif ah oo aad isticmaali karto iyo in weelkaaga gaarka ah uu diyaar kuu yahay.
- Waxaad sidoo kale ilaalin kartaa maqaarkaaga kahor inta aadan indhahaaga ku shubin dhibcaha/goojada adiga oo marinaya saliida/kareenka jeliga (sida Fasaliin). Si fiican u dhaq gacmahaaga kadib markaad isticmaasho guujada.
- Dhaq oo qalaji gacmahaaga, kadibna gabo galoofis cusub.
- Weelka ay ku jiraan dhibcaha/goojada waxaad ka furtaa furka. Si tartiib ah hoos ugu soo jiid maqaarka hoose ee isha daawada lagu shubayo ilaa jeeb yar uu kaga samaysmo inta u dhexeysa maqaarka hoose ee ishaada iyo qeybta cad ee ishaaada. Adigoo isticmaalaya weel dhibcinta, meeshaas jeebka camal ah waxaad ku shubtaa hal dhibic.

- Beddel furka qalabka dhibcinta oo xir dhalada ay ku jiraan dhibcaha adigoo la daahin.

- Haddii wax dhibco ah ay ku daataan dhabannadaada, waa inaad isla markiiba ku tirtirtaa tiish, tiishkaas oo ay tahay in lagu tuuro weelka gaarka ah, kadibna meesha dhibicda gaartay ku dhaq biyo diirran iyo saabuun.

### Ma jiraan wax saameyn ah oo ka yimaada daaweynta?

Dhibcaha/goojada ayaa laga yaabaa inay marka hore ku xanuunjiso waxayna badanaa sababtaa in isha ay noqoto mid bararan oo dareen leh. Haddii xanuunjinta ama caabuqa ay noqdaan kuwo aad u daran waa inaad talo ka raadsataa dhakhtarka. Fluorouracil 1 % waxay sababi kartaa inaad aad u dareento/indhaha ay diidaan fiirinta iftiinka qorraxda. Waa inaad ka fogaataa u bayla noqoshada iftiinka qoraxda ee xooggan inta aad isticmaalayso dhibcaha/goojada.

Bukaanada qaar ayaa laga yaabaa inay la kulmaan saameyno naadir ah oo ka yimaada dhibcaha/goojada taasoo sababi karta in daboolka/maqaarka sare ee isha oo uu hoos u soo dhaco (Ptosis). Tani waxay u baahan kartaa qaliin si dib loogu habeeyo daboolka/maqaarka.

### Ma jiraan daaweyn nooc kale ah oo la heli karo?

Waxaa laga yaabaa inay jiraan daawayno kale oo dhakhtarka ayaa kaala hadli doona kuwaas. Haddii aad dareento inaad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah fadlan xor u noqo inaad weyddiiso dhakhtarkaaga ama kalkaalisada caafimaadka ee takhasuska u leh indhaha (shaqaalahaaga muhiimka ah).

### Maxaa dhacaya haddii aanan qaadan wax daaweyn ah?

Buradaada ayaa laga yaabaa inay sii korto ama ay kugu soo noqoto. Tani waxay adkayn kartaa daaweynta waxayna kordhin kartaa xanuunka isha. Waxaa jiri kara khatar sii kordhaysa oo ah burada ay ku baahdo/faafto isha iyo qaybaha kale ee jirka.

## Ma jiraan wax kale oo ay tahay inaan ogaado?

Xusuusnow in dhibcaha/goojada isha laguu soo qoray adiga oo keliya, waana inaadan waligaa u ogolaan cid kale inay isticmaasho.

Dhibcaha/goojada waxaad ku kaydisaa qaboojiyaha. Dhibcaha waxay noqon karaan kuwo sun ah haddii si khaldan loo isticmaalo, fadlan xaqiiji in lagu kaydiyo meel ammaan ah oo aanay carruurtu gaari karin.

**Laguma talinayo in haweenka uurka leh ay gacmagacmeeyaan dhibcaha/goojada. Waa in taxaddar la sameeyaa haddii ay jirto suurtagalnimo ah in uur ama naasnuujin ay yimaadaan.**

**Ragga iyo dumarkuba waa inay isticmaalaan hababka la iskaga ilaaliyo uurka inta lagu jiro iyo ilaa saddex bilood kadib qaadashada daawada dhibcaha indhaha ee Fluorouracil 1%.**

## Jawaab celin

Jawaab celintaadu waa inoo muhiim waxayna naga caawineysaa inaan wax ka bedelno daryeelka mustaqbalka.

Ka dib markii lagaa saaro isbitaalka ama aad ka xaadirto ballantaada bukaan-socodka waxaad heli doontaa qoraal wax lagaaga weydiinayo haddii aad qof kale kula talin lahayd adeegyadeena. Fadlan na sii wakhti yar oo aad uga soo jawaabto qoraalka, wax lacag ah lagaagama qaadi doono qoraalka oo waxaadna kaga bixi kartaa xilli kasta oo aad rabto. Nala shaqeyntaada ayaa si weyn lagaaga mahadinayaa.

**Macluumaad Dheeraad ah**

**Shakeel Herwitker**
**Farmashiistaha sare (Cudurada Dhiigga / soo saarista)**
**Taleefan: 0151 706 2098**
**Lambarka taleefanka fariimaha: 18001 0151 706 2098**

**Kalkaaliyeyaasha Takhasus u leh Kansarka Indhaha ee Qaybta Indhaha ee St Paul**

- **Gillian Hebbar**
- **Gwendolyn Hachuela**
- **Shirley Varghese**

**Tel: 0151 706 3976**
**Lambarka telefoonka qoraalka: 18001 0151 706 3976**

**Iimayl:**

**gillian.hebbar@rlbuht.nhs.uk**

**gwendolyn.hachuela@rlbuht.nhs.uk**

**shirley.varghese@rlbuht.nhs.uk**

**Qoraha: Waaxda Indhaha ee Isbitaalka St Paul**
**Taariikhda dib u eegista: Jannaayo 2026**

All Trust approved information is available on request in alternative formats, including other languages, easy read, large print, audio, Braille, moon and electronically.

يمكن توفير جميع المعلومات المتعلقة بالمرضى الموافق عليهم من قبل ائتمان المستشفى عند الطلب بصيغ أخرى، بما في ذلك لغات أخرى وبطرق تسهل قراءتها وبالحروف الطباعية الكبيرة وبالصوت وبطريقة برايل للمكفوفين وبطريقة مون والكترونياً.

所有經信托基金批准的患者資訊均可以其它格式提供，包括其它語言、 易讀閱讀軟件、大字

體、音頻、盲文、穆恩體（Moon）盲文和電子格式，敬請索取。

در صورت تمایل میتوانید کلیه اطلاعات تصویب شده توسط اتحادیّه در رابطه با بیماران را به اشکال مختلف در دسترس داشته باشید، از جمله به زبانهای دیگر، به زبان ساده، چاپ درشت، صوت، خط مخصوص کوران، مون و بصورت روی خطی  موجود است.

زانیاریی پێوەندیدار بەو نەخۆشانەی لەلایەن **تراستەوە** پەسەند کراون، ئەگەر داوا بکرێت لە فۆرماتەکانی تردا بریتی لە زمانەکانی تر، ئیزی رید (هاسان خوێندنەوە)، چاپی گەورە، شریتی دەنگ، هێڵی موون و ئەلیکترۆنیکی هەیە.

所有经信托基金批准的患者信息均可以其它格式提供，包括其它语言、 易读阅读软件、大字体、音频、盲文、穆恩体（Moon）盲文和电子格式，敬请索取。

Dhammaan warbixinta bukaanleyda ee Ururka ee la oggol yahay waxaa marka la codsado lagu heli karaa nuskhado kale, sida luqado kale, akhris fudud, far waaweyn, dhegeysi, farta braille ee dadka indhaha la', Moon iyo nidaam eletaroonig ah.